REGION KRONOBERG

2014-05-09

Cagaarshow nooca B

Warbixinta bukaan socodka iyo xeerarka ku dhaqanka. Xaashida ka ilaalinta faafinta ee dhakhaatiirta ka ilaalinta faafinta.

Waa maxay cagaarshow nooca B?

Cagaarshow nooca B waa fiirus caabuqa beerka oo ugu horreyn ku faafa dhinaca dhiiga iyo galmada. Cagaarshow nooca B wuxu ka jiraa dhammaan dunida oo dhan oo wuxuu aad caadi uga yahay dalalka qaarkood. Qiyaasti kala-badh dhammaan dadka waaweyn ee uu ku dhaco xanuunkan malaha wax ah calaamado cudur. Calaamadaha degdegga ah ee cagaarshowga nooca B waxay ahaan karaan yalaalugood, niyad u haynta cuntada oo xumaata, daal, calool xanuunyo aan si fiican u muuqan, xanuun jidhka ah iyo xummad. Xitaa cun-cun wuu yimaadaa iyo sidoo kale in qaybta cad ee indhaha iyo maqaarku midab jaalle ah yeeshaan (indhacaseeye). Dhinaca dadka waaweyn badanaaba cudurkani iskii ayuu u bogsadaa dhowr bilood gudahood oo qofku wuxu noqdaa mid bilaa xanuun ah. Carruurta uu ku faafo waxay khatar weyn ugu jiraan inay ku dhacdo infekshan muddo dheer jiraya (joogto ah). Dhinaca infekshanka joogtada ah qofku wuxu yahay mid faafinaya oo infekshanku wuxu wakhtiga dambe keeni karaa dhaawacyo beerka ah oo halis ah. Sidaas darteed kuwa leh infekshanka joogtada ah waa inay si joogto ah ula xidhiidhaan dhakhtarkooda maadaama arrintu noqon karto in la siiyo daaweyn yaraysa khatarta in fiirusku dhaawaco beerka. Booqashada iyo daaweyntu waa bilaash.
Waxa jira tallaal ka hortaga cagaarshow nooca B kaas oo la qaadan karo faafinta ka hor iyo 48 saacadood gudahood oo ka dambeysa xilliga faafinta.

Hababka faafinta

Cagaarshow nooca B wuxu ku faafi karaa haddii dhiig bukaa uu soo gaadho xuubabka jilicsan ee jidhka ama maqaar dhaawac leh. Cagaarshow nooca B waxa kale oo uu ku faafaa galmada, dhinacaas oo khatarta faafintu ay weyntahay dhinaca dhammaan noocyada wasmada/xidhiidhyada galmada. Faafintu waxa kale oo ay xitaa dhici kartaa dhinaca xidhiidhka dhow ee gudaha qoyska. Hooyo buktaa waxay infekshanka u gudbin kartaa ilmaheeda dhinacaa ummulida.
In irbaddaha mudidda iyo qalab ka mid ah lala wadaago qof qaba cagaarshow B markay noqoto dhanka si xun u isticmaalida irbaddaha waxay keentaa khatar faafin oo weyn. Xanuun gudbinta waxa si wax ku ool ah looga hortagi karaa iyadoo la adeegsado tallaal. Dadka ah xubnaha qoyskaaga iyo dadka kuu dhow (lamaanaha galmada) ee u baahan in la tallaalo waxa loo soo bandhiyaa arrintan oo bilaash ah.

Goorma ayaanu faafin cagaarshow nooca B?

Cagaarshow nooca B ma ku faafo isku qabashada laabta, dhunkashada ama ilmada. Sidoo kale saxarada, kaadida, mataga ama duufka aanu ku dhex jirin dhiig ma faafiyo. Dhiig gaadhay maqaar bilaa dhaawac ah isna sidoo kale ma keeno wax khatar oo faafin ah.

Hawlaha xirfadeed

Infekshan cagaarshow nooca B ma keento caadiyan xad u yeelida hawshaada xirfadeed ama waxbarashadaada.
Waxa si dhif ah kugu dhici karta in ay ku taabato xadeyn marka ay khuseyso shaqo, tababar ama ka qayb-qaadashada hawl kale hadii ay jirto khatar ah in faafin dhici karto.

Uurka iyo ummulida

Haweenay uur leh oo qabta xanuunkan waxay ku faafin kartaa ilmaheeda dhinaca la xidhiidha ummulida. Sidaas darteed dhammaan haweenka uurka leh waxa loo soo bandhigaa baaritaanka cagaarshow nooca B dhanka rugta xannaanada hooyooyinka. Si looga hortago in ilmaha cusub ee dhashay uu ugu faafo cagaarshow nooca B waxa si toos ah loo bilaabaa

smittskyddsenheten
Centrallasarettet, 351 85 Växjö. ☎0470-588278

tallaal ka dib ummulida.

Rabadhka ka hortaga uureysiga ee dhinaca wasmada afka, siilka ama futada
Rabadhka ka hortaga uureysiga waa difaac wanaagsan oo ka hortaga cagaarshow nooca B iyo xanuunada kale ee ku faafa galmada waana in la isticmaalo dhammaan xilliga wasmada haddii lammaanahaagu qaadi karo cagaarshow nooca B (qof soo lahaa xanuunkan ama ka tallaalan). Waa macquul in loo qaato in femidoom (rabadhka ka hortaga uureysiga ee haweenka) sidoo kale shaqeeyo laakiin habkan maaha mid loo qiimeeyay si cilmiyaysan. Waxa la qaadan karaa qiyaasid la mid ah markay noqoto waxa loogu yeero marada leefitaanka. Dhammaantood waxa khuseysa in la isticmaalo dhammaan xilliga wasmada/xidhiidhka dhow.

Raad raaca faafinta
Waxa aad muhiim u ah in la helo dadka kale ee ay dhici karto inuu faafay ee sii fidin kara infekshankan. Sidaas darteed waxa la fuliyaa raad raaca faafinta taas oo micnaheedu yahay in adigu aad raad raacaha faafinta mas'uulka ka ah u sheegtid dadka ay dhici karto inay adiga kugu faafiyeen – ama ay dhici karto in adigu aad ku faafisay. Waxa waajib kugu ah inaad wada-shaqayn samaysid xilliga raad raaca faafinta. Aqoonsigaaga ma loo sheegayo xidhiidhyadaaas.

Talada nadaafadda, ee ay tahay inaad raacdo si aan loogu fidin qof kale

- Feejignaan u yeelo in balastar lagu duubo xitaa nabarada wax yar ah.
- Haddii qof kaa caawinayo duubitaanka nabar waa in qofkaas isticmaalo gacmo gashi balaastiig ah.
- Alaabta dhiig qariyay si feejigan u xidh-xidh ka hor intaan la tuurin.
- Dharka dhiig ku daatay ku dhaq mashiin.
- Baraha dhiig ku yaalo tusaale ahaan dhulka waxa lagu nadiifinayaa maro la isticmaalayo mar keliya taas oo kadib la tuurayo. Kadib si fiiro badan ugu dhaq biyo iyo maaddooyinka nadiifinta.

Xeerarka ku dhaqanka, kuwaas oo aad ka helayso dhakhtarkaaga daryeelka si aanad ugu faafin qof kale

- Waa inaad timaadaa la kulanka dhakhtarka iyo dhiig qaadisyada uu dhakhtarkaagu u arko lagama maarmaan
- Waa inaad sheegto in dhiigaagu uu qabo cudur lays qabadsiiyo marka aad booqato dhakhtarka ilkaha ama daryeelka caafimaadka.
- Waa inaad sheegto in dhiigaagu uu qabo cudur lays qabadsiiyo haddii aad doonaysid inaad jidhka sawirro ku samaysid, dhegaha daloolisid ama samaynaysid daryeel kale oo qalab fiiqan la isticmaalayo oo dhiigid iman karto, tusaale ahaan daloolin.
- Ku wargeli dhakhtarkaaga daryeelka haddii aad leedahay lammaane ama xubin qoyska ah oo u baahan kara in laga tallaalo ka hortaga cagaarshow nooca B.
- Waxa waajib kugu ah inaad ka hor wasmada/nooc kale oo xidhiidh dhow ah ku wargeliso lammaanahaaga inaad leedahay cagaarshow nooca B. Tani waxay khuseysaa dhammaan nooc kasta oo xidhiidh galmo/dhaq-dhaqaaqyo ah. Waa inaad samaysaa wargelinta ku saabsan cagaarshow nooca B xitaa haddii aad qorshaynaysaan inaad isticmaashaan rabadhka ka hortaga uureysiga/femidoom/marada leefitaanka.
- Haddii lammaanahaagu qaadi karo cagaarshow nooca B (qof soo lahaa xanuunkan ama ka tallaalan) waxa khuseysa sida soo socota: Dhinaca wasmada uu gusku ku

smittskyddsenheten
Centrallasarettet, 351 85 Växjö. ☎0470-588278

jiro gudaha siilka, futada ama afka, waa in la isticmaalo rabadhka ka hortaga uureysiga dhammaan xilliga wasmada.

- Haddii dhiigaagu gaadho maqaar qof kale oo nabar leh, indhaha, sanka ama afka qofkaas si degdeg ah ugu dhaq biyo. Ku wargeli qofkaas in dhiigaas uu leeyahay faafinta cagaarshow nooca B iyo in isaga/iyada sida ugu hakhso badan ula xidhiidho rugtooda dareelka/caafimaadka, isbitaalka infekshanka ee ugu dhow ama 1177/Hagaha daryeelka si loo qaato go'aanka tallaal bilaash ah.
- Ha la wadaagin dadka kale qalabka faya-dhawrkasida sida qalabka lagu xiirto ama caday.
- Haddii aad isku durtid mukhaadaraad waa inaad haysataa irbad gaar kuu ah iyo tuumbooyin oo aanad u oggolaan in dad kale isticmaalaan kuwan. Maaha inaad isticmaasho koobab isku dar oo la wadaago ama qalab kale. Qalabka durida waa in loo kaydiyo qaab ah in aanay wax khatar oo faafin u yeelan dadka kale.
- Maaha in aad bixiso dhiig, ku deeqdo shahwad, ugkun, xubin ama xubin loogu talogalay xubno jir ku tallaalid.

Cagaarsow nooca B waxa lagu sheeggaa cudur dadweynaha khatar u ah marka loo eego sharciga ilaalinta faafinta. Sidaas darteed waxa waajib kugu ah inaad raacdo xeerarka ku dhaqanka ee dhakhtarkaagu ku siinayo. Dhaktarka ilaalinta faafinta ee gobolkaaga waxad ka codsan kartaa dib u fiirinta xeerarka ku dhaqanka.

smittskyddsenheten
Centrallasarettet, 351 85 Växjö. ☎0470-588278